

Juun 7, 2023

Qoysaska qaaliga ah, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta,

Deyrtii 2022, Dugsiyada Dadweynaha ee Edmonton waxay sameeyeen sahan tirakoobka ardayda si ay wax badan uga bartaan ardayda aan u adeegno. Ardayda Fasalada 4-aad ilaa 12-add waxay fursad u heleen inay wadaagaan macluumaadka ku saabsan naftooda. Su'aalaha ku saabsan sahanka ayaa ka hadlay kuwa soo socda:

- Aqoonsigooda asalka wadanka ah
- aqoonsiga isirka
- qoomiyada
- diinta ama ku xidhnaanta ruuxiga ah
- aqoonsiga sinjiga
- hanuuninta galmada (Fasalada 7 ilaa 12 kaliya)

Kaqeybgalka sahanka ayaa gabi ahaanba iskaa wax u qabso ah. Waaliddiinta aan dooneynin in ilmahoodu ka qeybqaato ayaa ilmahooda la bixi karaan. Ardayda ka qeybqaadatay sahanka ayaa kaliya ka jawaabey su'aalaha ay dareemeen jawaab celin raaxo leh.

Mahadsanid!

In ka badan 55,800 oo arday ayaa ka jawaabtay sahanka, taas oo ah boqolkiiba 73 heerka jawaabta. Waxaan rabaa in aan u mahadceliyo ardayda waqtiga qaadatay si ay dhammaystiraan sahanka. Waxaan si cajiib ah uga mahadnaqaynaa rabitaankooda ah inay wadaagaan macluumaadka ku saabsan naftooda. Waxaan ku faanaa in ardayda dugsiyadeenu ay ka yimaadeen asal kala duwan, dhaqamo, bulshooyin iyo khibrado.

Natijoooyinka sahanka

Natijoooyinka sahanka bilowga ah ayaa hadda laga heli karaa khadka tooska ah, oo ay weheliso macluumaad la cusboonaysiiyay ah iyo muuqaal cusub. Waxaan kugu dhiirigelinayaa inaad booqato [websaydhkeenna](#) si aad u aqriso warbixinta oo aad wax badan uga ogaato talaabooyinka xiga ee shaqadan.

Horey u socod

Dugsiyada Dadweynaha Edmonton waxaa ka go'an inay si ula kac ah uga shaqeeyaan cunsuriyadda, dib-u-heshiisiinta iyo sinnaanta iyada oo loo marayo ficil joogto ah, waxbarasho iyo horumar. Sanadaha soo socda, natijoooyinka sahanka waxaa lagu dari doonaa macluumaadka ardayda kale si ay sifiican ugu fahmaan sida ardayda khibrada dugsiyeed iyo meesha ay Qeybta ka qaadi karto tallaabo lagu yareynayo caqabadaha. Shaqadan ujeedadeena ayaa ah inaan qaadno ficillo keenaya mustaqbal ay ardayda oo dhami ku faani karaan cidda ay yihiin, dareemayaan inay ka tirsan yihiin oo ay ku guuleystaan Khibrad dugsiya.

Kii daacada kuu ahaa



Darrel Robertson
Kormeeraha Guud ee Dugsiyada